



Farriintani waxaa la soo geliyay iyada oo ah Ingiriisi waxaan si dhakhso ah loo soo gelin doonta iyada oo ah Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese:

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Oktoobar 11, 2021-ka

Ku socota: Hawl wadaagayaasha ODDS iyo Daryeel Bixiyayaasha  
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka  
Ujeedada: Lacagaha dhiirigelinta ah ee loogu talagalay shaqaalaha ka tirsan guryaha koox ahaanta loo degan yahay

ODDS waxay dhawaan heshay oggolaansho ay ku isticmaasho Sanduuqyada Dhaqaale ee Gargaarka Coronavirus (CRF) oo loogu talagalay lacag bixin ah \$500 oo la siinayo shaqaale kasta oo shaqeeya, waqti dhiman ama waqti buuxa, oo ka tirsan guryaha ay koox ahaan loo degan yahay ee dadka waaweyn iyo carruurta ee u adeega dadka qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka (I/DD).

Lacagahani dhiirigelinta ah ee halka waqti ah waxay aqoonsanayaan in xirfadlayaasha taageerada tooska ah ee safka hore kaga jiraan cudurka baahsan ee COVID-19, ee ka shaqeynaya in ay dadka reer Oregon ee qaba I/DD ka dhigaan kuwo badbaado qabo. Shaqaaluhu waa in ay si xiriir ah u shaqaaleysiisay hay'ad isku mid ah laga soo bilaabo Oktoobar 8, 2021 ilaa Noofambar 15, 2021 si ay ugu qalmaan.

ODDS waxay soo saari doontaa farriin wax gudbinaysa 'transmittal' oo wadata macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan nidaamka iyo shuruudaha loogu talagalay hay'adaha si ay si dhakhso ah maalgelin ugu helaan. Farriintani waa ogeysiinta ah in ay maalgelin la heli karo si ay hay'aduhu macluumaadkani ula wadaagi karaan shaqaalahooda.

Maalgelintani waxay diiradda saareysaa sii haysashada shaqaalaha. Xeerka Qorshaha Samata-bixinta Maraykanka ee dhawaan (ARPA) boqolkiiba 10 oo ah deeqda lacageed ee taageerada caafimaad ee federaalka (FMAP) ee loo qaybiyo daryeel bixiyayaasha guryaha koox ahaanta loo degan yahay waxaa loo isticmaali karaa qorista shaqaalaha.

Kani waa mid ka mid ah lacagaha dhiirigelinta ah oo badan iyo istiraatiijiyadaha ay ODDS fiirinayso si ay u ilaaliso una shaqaaleysiiso xoog shaqaale oo muhiim ah inta lagu jiro waqtigan adag.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa*  
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo [www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).